

Baadhitaanka iyo Raadinta "Covid-19" Su'aalaha badanaa la isweydiiyo

Ma dareemayo wanaag, ma hubo inay tahay covid-19

Haddii aad u malaynaysid inaad yeelan kartid astaamo-19, waa inaad isla markiiba talo ka heshaa adeegga intarneedka ee [NHS 111 online coronavirus service \(check your symptoms here\)](#)

Markaan fiiriyay astaamahayga, waxaan u maleynayaa inaan qabo covid-19, maxaan sameeyaa?

Waa inaad isla markiiba isgo'doomisaa oo aad diyaarsataa inaad iskaga baarto <https://www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/testing-for-coronavirus/> ama wac 119 haddii aadan lahayn internet.

Maxaan sameeyaa inta aan sugayo baaritaankayga / natiijadayda?

Inta aad sugeysid in laga baaro oo aad natiijadaada hesho waa inaad go'doonka ku sii jirtid. Qof kasta oo kale oo ka tirsan reerkaaga waa inuu isgo'doomiyaa 14 maalmood laga bilaabo markii aad calaamadaha bilawday (sida daraasaduhu muujisay dadku waxay yeelan karaan covid-19-illaa labo toddobaad astaamo la'aan). Waa inaad u sheegtaa dadka aad xiriir dhow la lahayd 48-dii saacadood ee la soo dhaafay in laga yaabo in aad qabtid coronavirus.

Natiijooyinka baaritaanka covid-19 waa wax lagama hilin

Haddii baaritaanka uu noqdo mid wax laga hilin ah, adiga iyo xubnaha kale ee reerkaaga uma baahnidin inaad isgo'doomisaan.

Natiijooyinka baaritaanka covid-19 waa laga hilay

Haddii laga hilo fayraska waa inaad sii waddaa isgo'doomiska ugu yaraan 7 maalmood laga bilaabo markii astaamahaagu bilaabmeen.

Xubnaha reerkaago waa inay dhammaystiraan 14 maalmood oo isgo'doomis ah laga bilaabo marki ugu horeysay ee aad muujisay astaamaha Halkan [ka fiiri macluumaad dheeri ah inta aad u baahan tahay inaad isgo'doomiso.](#)

Kadib Maxaa dhacay?

24 saacadood gudahood marka baaritaanka la helo ee loo yaqaan 'covid-19' waxaad ka heli doontaa qoraal ama digniin iimayl ah NHS Test and Trace (Baadhitaanka iyo Raadinta). Raadinaya qof kasta oo laga yaabo inuu xiriir toos ah la lahaa qof leh covid-19 waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah joojinta fiditaanka fayraska.

Fariinta qoraalka ama emaylka waxaa ku jira tilmaamo ku saabsan sida loo wadaago faahfaahinta dadka aad la yeelatay iso soo dhowaanshiyo xiriir dhowan ah Tan waxaa ku jira qoyskaaga ama dadka kale ee aad la nooshahay, iyo sidoo kale dadka aad xiriir toos ah la lahayd, ama 2 mitir gudahood, wax ka badan 15 daqiiqo. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad kala taliso meelaha aad dhawaan booqatay.

Macluumaadka aad bixiso waxaa lagu wareejin doonaa websydh aamin ah.

Haddii aadan haysan internet, waxaa kuu soo wacaya mid ka mid ah 25,000 xiriiri raad raacayasha. Adeeggu wuxuu adeegsan doonaa hal lambar taleefan kaasoo ah: 0300 013 5000

Kooxda xiriir raadinta ayaa adeegsan doonta macluumaadka aad siiso si loogu digo kuwa halista badan ugu jira inay qaadan fayras inay u baahan yihiin inay isgo'doomiyaan. Cid ka mid ah kuwa lala xiriiro iyada oo ay sababto tahay inay natiijada baaritaankaga coronavirus nuqutay ina laga hilay looma sheegi doono aqoonsigaaga.

Waan fiicanahay, laakiin Baadhitaanka NHS iyo Raadinta waxay ii sheegeen inaan xiriir la leeyahay qof Qaba covid-19

Baadhitaanka iyo raadinta ayaa fure u ah la dagaalanka faafitaanka covid-19. Haddii lagu sheego inaad la xiriirtay qof qabo cudurka coronavirus waxaad u baahan doontaa inaad isgo'doomiso (guriga joogtid) 14 maalmood laga bilaabo maalinta ugu dambeysay ee aad xiriirka aad la yeelatay qofka.

Ha ka tagin gurigaaga sabab kasta ha noqotee - hadaad u baahato cunto ama dawo, ka dalbo qadka tooska ah ama telefoonka, ama ka codso asxaabta iyo qoyska inay kugu tuuraan gurigaaga.

Dadka kale ee reerkeyga ka tirsan miyay sidoo kale qasab ku tahay inay isgo'doomiyan?

Dadka aad la nooshahay uma baahna in ay isgo'doomiyan haddii aadan lahayn astaamo.

Laakin, haddii aad la nooshahay qof khatar sare ugu sugan coronavirus, isku day inaad u diyaariso inay la joogaan asxaabtaada ama qoyskaaga 14 maalmood inta aad isgo'doomiska aad ku jirto. Hadeysan taasi suurta gal ahayn, waxaad ka heli kartaa [talo ku saabsan sida looga fogaado in cudurka coronavirus oo ugu faafo dadka aad la nooshahay NHS khadka tooska ah.](#)

Haddii aad mar dambe dareento inaay kugu soo baxeyso astaamaha lagu yaqaan covid-19 , waa inaad si dhakhso leh talo uga hesho

[adeegga intarneedka coronavirus ee NHS 111 \(calaamadaha halkan ka fiiri\)](#)

Miyaan u baahanahay inaan hal mar isgo'doomiyo?

Khasab maaha. Marka lagu eego qatarta soo-gaadhista dadka kaladuwan ee covid-19 waxa lagu weydiin karaa inaad isgo'doomisid wax ka badan hal munaasabad.

Ma awoodo inaan shaqeeyo haddii aan isgo'doomiyo, waa maxay caawimaadda la heli karaa?

Haddii aad isgo'doomisid u tahay Covid-19 (adiga ama xubin reerkaaga ka mid ah ayaa leh coronavirus, ama maxaa yeelay waxaa lagugula taliyay inaad la xiriirtay qof qaba cudurka 'coronavirus') waxaad dalban kartaa Mushaarka sharciga ah ee Bukaanka (£ 95.85 toddobaadkii) , ilaa 28 toddobaad).

Haddii aadan xaq u lahayn Mushaarka sharciga ah ee Bukaanka - tusaale ahaan, haddii aad iskaa u shaqeysato ama aad kasbato wax ka hooseeya Xadka Dakhliga Hoose ee £ 118 usbuucii - oo lagugula taliyo inaad isgo'doomisid, waxaad samayn kartaa codsi ah Universal Credit.

Haddii aad iskaa u shaqeysato, maamulka degmadaadu waxay awoodi karaan inay ku taageeraan ganacsigaaga iyagoo adeegsanaya maaliyaddooda sanduuqa dhibaataada. La xiriir golaha deegaanka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Macluumaadka ku saabsan taageerada buuxda ee dhaqaale ee ay heli karaan shaqsiyaadka isgo'doomiska ku jira iyo ganacsiyada waxaa laga heli karaa [websaydhka khasnadda HM halkan](#).

Kooxda London ee Baadhitaanka iyo Raadinta ee Kaqaybgalka Bulshada

Juun 2020

